

# Helitaanka Teknoolojiyadda ee Loo simanyahay Buugga Ardayga loogu tala galay ee Qalabka ka hadlaya



<b>Luuqadaha</b> .....	2
<b>Hordhac</b> .....	2
Maxay tahay sababta arday kasta qalabka loo siinayo?.....	2
Noocyada Qalabka.....	2
Helitaanka Teknoolojiyaddaada.....	2
<b>Aasaasiyaadka Teknoolojiyadda</b> .....	3
Ka taxadaridda iPad-ka ama Chromebook-ga MPS-kaaga.....	3
Qaadidda iyo Meeldhigista.....	3
Galitaanka iyo Baaswaarada.....	4
Qarsoonaanta, Ammaanka iyo Maamulidda Degmada.....	4
<b>Waxyaabaha laga soo reebayo Isticmaalka</b> .....	4
Isticmaalka Mas'uuliyadda leh.....	5
Ku Isticmaalka Guriga.....	5
Habdhaqanka aan la Aqbali karin iyo Howlaha.....	5
Heerarka Dhacdada ee Waxyeeloobay ama Aan sida Wanaagsan loo Isticmaalin ee Teknoolojiyadda.....	7
Sawiraanta, Macluumaadka, Xogta.....	8
Codka, Muusigga, Cayaaraha.....	8
Aaladaha/qaybaha.....	9
<b>Ilo Kale</b> .....	9
Siyaasadaha Degmada ee Muhiimka ah.....	9
Helitaanka Internetka.....	9
Kaalmaad dhanka Farsamada ah.....	9
Lifaaqyada.....	10
<b>Damaanadda Isticmaalka Teknoolojiyadda</b> .....	11

# Luuqadaha

Kani waa qaybta luuqadda **INGIRRISKA** ah ee Buugga Ardayga loogu tala galay ee Qalabka Si aad u aragto nooca dijitaalka ah ee tarjuman, fadlan bookho [MPS Technology Student Handbook](#)<sup>1</sup> ee Isha.

## Hordhac

Barnaamijka Helitaanka Teknoolojiyadda ee Loo simanyahay ee kujira MPS waxa uu u diyaarsan yahay in uu ardayda dhammaantood siiyo qalab heerkooda waxbarashada ku haboon, kaasoo ay awoodaan in ay ku isticmaalaan labadaba guriga iyo dugsigaba. Aradyda inta badan fasaladu waxay qalabkaan ka qaadan doonaan lana imaan doonaan dugsigaba maalin kasta. Barnaamijkaanu wuxuu muhiim u yahay xaqiijinta helitaanka teknoolojiyadda heerka waxbarashada ku haboon in ay ardayda dhammaantood helaan.



### Maxay tahay sababta arday kasta qalabka loo siinayo?

Teknoolojiyaddu waxay noqon kartaa aalad aad u awood badan, khaasatan marka ardayda helitaan ay u simanyihiin loo siiyo qalabka ku haboon heerkooda waxbarashada. Teknoolojiyaddu waxay badashaa hanaanka waxbarashada, sababtoo ah waxay waxbarashada ka dhigaysaa mid qof walba u gaar ah si loo buuxiyo baahiyaha shakhsiga ah ee ardayga iyo rabitaanadiisa, iyo sidaa si lamid ah in awood loo yeesho taageerada iyo balaarinta howlaha waxbarashada ardayga.



### Noocyada Qalabka



Fasalada **PreK-2** waxay helayaan iPad-yo.



Fasalada **3-12** waxay helayaan Chromebooks.

**Fiiro gaar ah:** Qaar ka mid ah ardayda helaya adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ayaa u baahan kara iPadka halkii ay ka isticmaali lahaayeen Chromebook, ama taas caksigeeda ayada oo lagu salaynayo Baahida Ardayga U gaarka ah (IEP). Qoysasku waa in ay la xiriiraan maareeyaha kiiskooda, hadday u baahdaan wax ka duwan waxa ay heleen.



### Helitaanka Teknoolojiyaddaada

Teknoolojiyadda waxaa ardayda u qaybin doonaa dugsigooda. Teknoolojiyadda ardayda waa in ardayda la siiyaa lagulana socdaa hanaanka maareynta hantida teknoolojiyadda ah ee degmada.

Haddii iPad-kaaga ama Chromebook-gaagu u baahdo diyaarin, isticmaal tilmaamaha ku saabsan sida loo bilaabo isticmaalka ee la socda xirmadaada teknoolojiyadda ah. Waxyaabahaan waxaa sidoo kale laga heli karaa [The Source](#).<sup>2</sup>

## Aasaasiyaadka Teknoolojiyadda



### **Ka taxadaridda iPad-ka ama Chromebook-ga MPS-kaaga**

Waa mas'uuliyaddaada in aad ka taxaddarto iPad-kaaga ama Chromebook-gaaga kuwaas oo dugsiagaagu ku amaahinayo si aad waxbarasho ahaan ugu isticmaasho. Waa kuwaan waxyaabaha aad samayn karto si aad uga taxaddarto qalabkaas teknoolojiyaddaada aad uga dhigi lahayd mid ammaan ah.

- Dabka gali qalabkaaga habayn walba.
- Ammaan ka dhig marka aad dugsiaga aadayso iyo marka aad fasalka kujirto.
- Ka taxaddar qalabkaaga.
- Ahow mid mas'uul ah oo ilaalinaya marka aad ku isticmaalayso dugsiaga iyo gurigaba.
- Lama ogolo in cabitaan iyo cunto toona u dhowyihiin teknoolojiyadda.
- Si taxaddar leh u gali fiilooyinka/xarkaha teknoolojiyadda.
- Ma qurxin kartid dusha kore ee iPad-ka/Chromebook-gga. Waxyaabahaan waxaa kamid ah istiikarada, calaamadaha, ama waxyaabaha kale ee shakhsi ahaanta ah.
- Waxyaabaha cuub waa in aan marna la dul saarin teknoolojiyadda.
- Xaqiiji in aad la baxdo aadna qaadata Chromebook-gaaga adiga oo isticmaalaya kiiboorka, shaashada lama ogola (arintaani waa midda ugu badan ee waxyeelada keenta).
- Xaqiiji in aan waxba saarnayn kiiboorka kahor inta aadan daboolka Chromebook-ga xirin.
- Qalab kasta waxa uu leeyahay calaamad koodh taagan oo MPS leedahay ah. HA bixin, ha waxyeelayn, waxna ha ka badalin calaamadda si kasta oo ay noqotaba.



### **Qaadidda iyo Meeldhigista**

#### **Cimilada iyo Deegaanka**

Ka ilaali teknoolojiyadaada cimilada. Ka ilaali iPad-kaaga/Chromebook-gaaga heerkulka aadka u sareeya adiga oo ku xafidaya boorsadiisa mar walba. Mar kasta ku qaado boorsada dhabarka ama boorsada buugta marka aad banaanka joogto. Maskaxda ku hay macluumaadka soo socda:

- Ha uga tagin teknoolojiyadaada meel kuluul ee heerkulka ka sareeya 95° F.
- Ha uga tagin teknoolojiyadaada heerkulada qabow ee ka hooseeya 32° F.
- Ka fogee teknoolojiyadaada biyaha iyo huurka xad-dhaafka ah.

#### **Qaadista iyo Meel dhigista Guud**

1. Si aad uga ilaalisoo in la xado, marna qalabka ha uga tagin meel aan lagala socon karin marka aad dugsiaga joogto. Goobaha aadan kala socon karin waxaa kamid ah fasalada aan xirnayn, qolalka santuukhda, qolalka barashada kombuyuutarka,

xarunta maktabadda/warbaahinta, qolka qadada, suuliyaasha, waddooyinka la marayo, ama meel kasta oo kamid ah barxadda dugsigu, oo ay kujiraan barxadaha cayaaraha iyo isbootyiga.

2. Ha ooga tagin qalabka sagxadda ama dhulka, xataa haddii qalabku boorsada kujiro ama boorsada dhabarka. Waxaa dhici karta in lagu istaago oo la waxyeelleeyo.
3. Ardayda dhigata fasalada 6-12: haddii aadan qalabkaaga in aad wax ku barato ugu baahnayn, ama haddii macalinkaagu kuu sheegay in aadan qalabka fasalka la imaan, ku kaydi oo ku xir santuukhaaga. Ha ooga tagin qalabka meel cidlo ah gudaha boorsada ama boorsada dhabarka. Mar kasta oo qalabkaagu kaa maqan yahay uusana oolin guriga ama uusan kujirin santuukh xiran, waxaad usii dhawaanaysaa khatarta in lagaa xado.



## Galitaanka iyo Baaswaarada

iPad-yada iyo Chromebooks-yada MPS waxay leeyihiin qaab diyaarsan si loo isticmaalo. Ardaydu waxay u baahnaan doonaan iimayladda ay MPS siisay iyo baaswaarada si ay u galaan teknoolojiyadda iyo aaladaha waxbarashada. Macalimiintu waxay mar labaad baaswaarka u samayn karaan ardayda aan xasuusan baaswaarkoodii.

Ardaydu waa in ay [iska diiwaangaliyaan Adeegga Ismaamulka Baaswaarka](#)<sup>3</sup> kaddib marka ay helaan ciwaankooda iimaylka iyo baaswaarkooda. Marka aad adeeggaan iska qorto, waxaad awood u yeelan doontaa in aad [badasho baaswaarkaaga](#)<sup>4</sup> mustaqbalka, lacala haddii aad ilowdo.



## Qarsoonaanta, Ammaanka iyo Maamulidda Degmada

Jawiga dijijitaalka ah wuxuu fursado siinayaa waxyaabaha wanaagsan iyo kuwo xun ee aruurinta xogta iyo isla wadaagidda. Si aad caruurta loo ilaaliso, waxaa jira dhowr sharci oo federaal kuwaas oo lagu maamulo aruurinta, isticmaalka, iyo isla wadaagidda xogta shakhsiga. Si loo ilaaliyo u hogaansamidda shuruucdaan federaalka ah iyo shuruucda dheeraadka ah ee gobolka, MPS waxay dib u eegaysaa qarsoonaanta xogta iyo siyaasadaha ammaanka ee dhammaan softweerada iyo aaladaha kuwaas oo laga heli karo meelaha wax lagala soo dego ee adeegga/aaladaha. Degmadu waxay sidoo kale ilaalinaysaa liiska websaytyada la raadiyo, kuwaas oo u baahan galitaanka macluumaadka ardayga iyo/ama u baahan galitaanka ardayga. MPS waxay sidoo kale isticmaashaa barnaamijyo noocyo softweero kala duwan iyo aalado ah kuwaas oo gacan ka gaysanaya maaraynta badqabka ardayga, sidaasoo kale-kala miiridda taasoo qabanaysa xiraysana waxyaabaha khatarta ah ama waxyeelada leh marka ay isticmaalayaan teknoolojiyadda degmadu bixiso.

DHAMMAAN qalabyada MPS waxaa loo iskaan garaynayaa si maamulid ah mar kasta si loo xaqiijiyo in goobaha ammaanka aan la badalin ama aan la tirtirin. Haddii arday uu galo qaybaha gudaha ah ee qalabka, uu soo dajiyo aalad badalaysa setting-ka qalabka, ama uu gacantiisu ku badalo setting-ka, waxaa qaban doona cawaaqibka habdhaqanka, si waafaqsan heerka dhacdada ku cad dukumiintigaan.



## Isticmaalka Mas'uuliyadda leh

Ardayda waxaa la haysan doonaa Chromeboob ama iPad ayaka loo xilsaaray. Haddii ay Chromebooke-gooda ama iPad kooda qaadaanayaan inta u dhexaysa dugsiga iyo guriga maalin walba, waa in ay xqiijiyaan in ay teknoolojiyaddooda kusoo celiyaan dugsiga maalin walba ayada si buuxda u dabaysan.

Ardaydu waa in ay qalabkooda dugsiga keenaan dhammaan xiisadaha, in macalin si gaar ah ugu sheego in aysan keenin maahane. Ardaydu waxay mas'uul ka yihiin dhammaystirka dhammaan shaqooyinka koorsada, xataa haddii ay uga tagaan teknoolojiyaddooda guriga.

Teknoolojiyadd degmadu soo saartay ee loogu tala galay in loo isticmaalay howlaha dugsiga. Kaliya ardayda Dugsiyada Dowliga ah ee Minneapolis ayaa gali kara Chromebooks-ka iyo iPad-yada.

Ardaydu waa in ay galaan Chromebook/iPad kooda ayaka oo isticmaalaya ciwaanka iimayla dugsigu siiyay. Waa in aad ahaataa markasta muwaadin ku wanaagsan qalabka casriga ah adiga oo raacaya tilmaamaha soo socda:

- **Qiimee oo Ilaali Naftaada**- Qiimee talaabooyinkaaga. Ka taxaddar wadaagidda maxluumaadka, sawiraanta, iyo muuqaalada kale ee onleenka la soo dhigo. Cidna ha la wadaagin macluumaadkaaga gaarka ah, tafaasiisha xiriirka, amajadwaladaada howlaha. Ilaali baaswaarkaaga; hala wadaagin baaswaarkaaga cidna.
- **Qiimee Naftaada iyo tan Dadka kaleba** - Ixtiraam u muuji dadka kale. Ha u adeegsan teknoolojiyadda inaad kaga hortagto, u xoog sheegato, ku dhibaataayso, ama aad ka xanaajiso dadka. Waa in aad raacdaa [Minneapolis Public School District's Bullying and Hazing Prohibition Policy 5201](#).<sup>5</sup> Si aad si dhakhso ah ugu soo gudbiso habdhaqan kasta oo oo aan haboonayn oo laguugula kacay marka aad onleenka tahay macalinkaaga.

Ardaydu waxay heli karan badalaadda iPad-ka ama Chromebook-ga marka qalabka la siiyay la dayactirayo. Haddii dib u dhac uu ku yimaado ku wareejinta badalaadda, macalinku wuxuu ardayga u ogolaan doonaa in uu dhammaystirto koorsada looga baahan yahay asaga oo qalabka haysan.



## Ku Isticmaalka Guriga

Haddii ardaygu keeno teknoolojiyaddiisa guriga si uu wax ugu barto, waa in uu u hogaansamaa Xeerarka iyo Shuruucda MPS (U tixraac Policy 6415 ee isticmaalka shabakadaha internetka ee waxbarashada). Ardaydu waxay ku xirmi karaan shabakadda onleenka ah ayaka oo isticmaalaya qalabka degmadda, laakiindhammaan isticmaaleyaasha qalabku waa in ay u hogaansamaan xeerarka degmada.



## Habdhaqanka aan la Aqbali karin iyo Howlaha

Ardaydu ma ahan in ay ilaha teknoolojiyadda degmada u isticmaalaan si ay:

- U helaan, u abuuraan, ama macluumaad u diriraan si ay u faafiyaan been ama marin habaabin, xadgudub, waxyeelo, ama lagu xadgudbo dadka kale.
- U helaan galitaan aan loo ogolaan ama aan haboonayn oo ku saabsan ilaha teknoolojiyadda.
- U isticmaalaan, ula soo dagaan, u xafidaan, ama u diraan sawirada luuqadda aan haboonayn, sawiraan, ama macluumaad dhijitaal ah oo kale.
- Ku sameeyaan qishka, oo ay kujiraan helitaanka ama bixinta jawaabaha imtixaanaadka; raadinta iyo/ama minguurinta jawaabaha ama macluumaadka ee internetka ilaha kale ee elektorooniga ab; minguurinta iyo gudbinta macluumaadka, shaqada, layliyada ai iskood ah, ama ka qaybqaataan qaababka kale ee lamidka ah ee khiyaanada elektoroonigga ah.
- Ku xadgudbaan xaquuqda lahaanshaha ama heshiisyada shatiga.
- Helaan ilaha aan haboonayn ama la xiray.
- Cid la wadaagaan ama ay soo dhigaan macluumaad si gaar ah tilmaan u bixinaya kaasoo ku saabsan naftiisa ama dadka kale taasoo gacan ka gaysan karta in qof uu ogaado goobta aad ku sugan tahay ama qof kale uu ku saugan yahay. Arintaan waxaa kamid ah waxyaabaha sida ciwaanka iimaylka, magaca oo dhammaystiran, ciwaanada guriga ama dugsiga, lambarada teleefoonka, waalidka ama magaca mas'uulka, ama magaca dugsiga.
- In ay wax ka badalaan hanaanka shaqada, ay soo kordhiyaan xanibaado, ay meesha ka aaraan baraha ammaanka, ama ay waxyeeleeyaan ilaha teknoolojiyadda.
- Ay lasoo dagaan aalado aan ka ahayn kuwa ay ogolyihiin Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis.



## **Heerarka Dhacdada ee Waxyeeloobay ama Aan sida Wanaagsan loo Isticmaalin ee Teknoolojiyadda**

### **Dhacdooyinka heerka 1**

Qaladaadka ficilada heerka 1 waa kuwo fudud waxaana wax looga qabanayaa fasalka dhexdiisa. Wax ka qabashooyinka loola dan leeyahay in lagu saxo habdhaqanka waxbarashada badalka ah, si ardaydu u barataan una muujiyaan habdhaqan ammaan ah oo ixtiraam leh.

Tusaalooyinka Heerka 1 dhacdooyinka qalabka waxaa kamid noqon kara:

- Isticmaalka aalado ama galitaankawaxyaabaha internetka kujira ee aan looga baahnayn howlaha waxbarashada;
- Ula dhaqmidda teknoolojiyadda si aan taxaddar lahayn (sida ka saarista boorsa deeda, in aan lagu ilaalinayada boorsada dhabarka marka la safrayo, wax la cunayo ama wax la cabayo inta qalabka la isticmaalayo).

### **Dhacdooyinka heerka 2**

Dhacdooyinka habdhaqanka ee heerka 2 waa kuwo lagu maaraynayo-fasalka gudihiisa waxaana kamid noqon kara wax ka qabashooyinka dheeraadka ah ee ka imaanaya maamuleyaasha ama shaqaalaha kale ee taageerada, kuwaas oo fasalka ku riixaya in uu bixiyo taageero ama fududeeyo faahfaah-ta-wada sheekaysiga fasalka ama wakhtiga muujinta.

Tusaalooyinka dhacdooyinka qalabka ee heerka 2 waxaa kamid noqon kara:

- Waxyeeladaulakaca ah ee loo gaysanayo qalabka (sida shaashadda oo jabta taasoo ay sababto in si ulakac ah loo tuuro ama loo rido qalabka; warfinta boorsada ama boorsada dhabarka la saarto taasoo qalabku ku dhexjiro; ku istaagidda qalabka; in si ulakac ah dareere loogu daadiyo qalabka; waxyeelo lagu sababo qalabka ayada oo la adeegsanayo qalab aysan degmadu soo saarin).
- In shay la isla wadaago ayada oo aan fasax la haysan, qishka ama khayaanada, ayada oo la adeegsanayo shaqada daka kale taasoo laag helo si dhijitaal ah.
- Fara galinta waxyaabaha gudaha ee qalabka ama samaynta wax ka badalada aan fasaxa loo haysan ee lagu samaynayo hanaanka shaqada qalabka, taasoo loo yaqaano jabsashada qalabka.
- Isticmaalka kaamarada si loo qaado sawiraanta dadka kale ayada oo aan fasax laga haysan.
- Luminta qalabka ama alaabta.

### **Dhacdooyinka heerka 3-5**

Heerka 3-5 ee dhacdada waa kuwo ada uga muhiimsan dabiici ahaan waxayna keeni karaan welwelo ammaan oo ku saabsan ardayga iyo/ama dadka kale. Dhacdooyinkaan waxay keeni karaan waayidda kumeelgaarka ah ee faa'iidada in qalabka guriga loo qaato, ama waxay u baahan karaan korjoogtayn marka qalabka la adeegsanayo.

**Fiiro gaar ah:** Qaar kamid ah xadgudubyadaan waxaa ka dhalan karta **cayrinta ama saarista ardayga** ee dugsiya, ayada oo ay la socdaan qorshe loogu tala galay wax kaqabashada iyo kaalmooyinka dheeraadka ah.

Tusaalooyinka Heerka 3-5 dhacdooyinka qalabka waxaa kamid noqon kara:

- Waxyeelada ulakaca ah ee lagu soo celceliyo ama luminta teknoolojiyadda ama alaabta.
- U isticmaalidda qalabka dhibaataaynta internetka, waxyeelaynta, ama xadgudubka.
- Dirista ama soo dhigista fariimo ama sawiraan aan haboonayn.
- Talaabooyinka kale ee xadgudubka ku ah buuggaan gacanta.

## FIIRO GAAR AH



Dugsiyadu waxay xadidi karaan tirada Chromebooks/iPad-yada la badali karo. Haddii ardaygu dhacdada kusoo celceliyo, khaasatan waxyeelada ulakaca ah ama si khaldan u isticmaalidda xad-dhaafka ah, waxay **lumin karaan faa'iidooyinka** in ay haystaan Chromebook/iPad loo diyaariyay **sannad dugsiyeedka inta ka dhimman.**



### Sawiraanta, Macluumaadka, Xogta

Dhammaan xogaha iyo sawiraanta lagu sameeyay qalabka waxaa qabanaya siyaasadaha MPS sidoo kale

sida shuruucda federaalka iyo kuwa gobolka. Ardaydu waxay kaliya qaadan karaan sawirka, muuqaalka, ama duubi karaan maqaal inta lagu jiro maalinta dugsiya, haddii macalinka ama maamuluhu uu ugu dhii bo sidii shaqada dugsiya. Marna ha sawirin, muuqaal haka duubin, hana abuurin maqaal duuban oo ku saabsan qof adiga oo aan haysan ogaanshaha iyo ogolaanshaha qofka.

- Ku isticmaalidda qalabka elektoroonigga ah iyo kaamaradu waa ka mamnuuc qolalka iyo suuliyaasha.
- Ha u isticmaalin kaamarada in aad ku qaaddo sawiro ama muuqaalo aan galmo ahaan ahayn kuwo wanaagsan.
- Ha u isticmaalin kaamarada si aad sawiro uga qaado ama aad cid ula wadaagto macluumaadka shakhsiga ah aad adigu ama qof kale leeyahay.
- Ha isticmaalin kaamarada ama makarafonka si aad u bahdisho, u dhibaatayso, ama ugu xadgudubto qof qaab ka ay rabto ha noqotee, dadkaas oo ay kujiraan ardayda, shaqaalaha ama dadyowga kele.
- limay ahaan ha ugu dirin, interneka ha soo dhigin, ama si elektoroonig aha ha u dirin sawiraanta, muuqaalka, ama maqalka duuban ee dadka kale adiga oo aan fasax ka haysan.



### Codka, Muusigga, Cayaaraha

Codka Chromebook/Ipad kaagu waa in la xiraa mar kasta in macalinkaagu kuu ogolaado in aad fur to codka ama kor u qaado codka shaqada fasalka darteed maahane. Macalinkaagu



walaga yaabaa in uu sidoo kale ku siiyo fasax aad ku isticmaalayso qalabka wax lagu dhegaysto ama sameecado. haddii sidaani dhacdo, xaqiiji in heerka codku gaaban yahay si qalabka aysan u maqlin dadka kuu dhow.



## Aaladaha/qaybaha

Aradydu masoo dajin karaan waxaalado ah ama qaybo ah teknoolojiyadooda kuwaasoo uusan dugsigoodu u ogolaan ama degmadu. Ardaydu ma ahan in ay lasoo dagaan aaladaha ama in ay rakibtaan qaybaha in macalinkoodu usheego sidaas maahane.

## Ilo Kale



### Siyaasadaha Degmada ee Muhiimka ah

- [Xeerka 6415: Isticmaalka Internetka Iyo Shabakadda waxbarashada](#)<sup>6</sup>
- [Sharciga 6415B: Shuruucda Internetka, Iimaylka Iyo Shuruucda habakadda Isticmaalka Ardayga](#)<sup>7</sup>



### Helitaanka Internetka

MPS waxay siin doontaa goobo internet ardayda baahida ugu badan u qaba. Si kastaba ha noqotee, qoysasku waa inay ogaadaan in calaamadaha hotspot ay u dhici karaan sababo kala duwan awgood. Helitaan internet xawaare sare leh oo laga helo adeeg bixiyaha ayaa lahaan doona isku xirnaanta ugu wanaagsan. [Booqo bogga wireless ee magaalada Minneapolis](#)<sup>8</sup> si aad wax uga ogaatid helitaanka internet-ka ee qiimaha jaban iyo kan jaban. Qoysaska u qalma barnaamijyada kaalmada bulshada waxay marinka internetka ka heli karaan ugu yaraan \$ 10 / bishii. Qoysasku waxay sidoo kale codsan karaan [Dheefta Balaaran ee Xaaladaha Degdega ah](#)<sup>9</sup>. Ayada oo ay sabab u tahay helitaanka kooban iyo isku halaynta goobaha internetka, waxaan qoysaska ku dhiirigalinaynaa in ay codsadaan Dheefta Balaaran eee Xaaladaha Degdega ah (ama xulashooyinka kale ee diyaarka ah ayada oo degmada la adeegsanayo) si ay u helaan internet qiimo jaban kahor inta aysan internetka codsan.



### Kaalmaad dhanka Farsamada ah

#### IT Miiska Adeegga

Haddii aad wajahayso arimo farsamo oo ku saabsan Chromebook/iPad degmadu soo saartay, wac IT Miiska Adeegga IT (612) 668-0088. Saacadaha miiska adeeggu waa Isniinta-Jimcaha laga bilaabo 7:30 subaxnimo-4:00 galabnimo.

### Badalidda Teknoolojiyadda

Fadlan usoo sheeg macalinkaaga arimaha teknoolojiyadda ama dugsiga si dhakhso ah. Arintaan waxaa kamid ah teknoolojiyadda oo joojisa shaqada, waxyeelowda, ama lunta ama la xado.

### **Cusboonaysiinta Hanaanka Shaqada iyo Sofitweerka**

Mararka qaar, aaladaha softi, weerka ah, iyo hanaanada shaqadu waxay u baahan yihiin cusboonaysiinsi teknoolojiyadda looga dhigo mid shaqaynaysa si sax ah ammaanna ah. Ardayda waxaa laga doonayaa in ay raacaan tilmaamha adegmada eerakibaadda ama cusboonaysiinta saftiweerka, aaladaha, iyo cusboonaysiinta hanaanada shaqada.



#### **Lifaaqyada**

1. [bit.ly/MPStechhandbook](https://bit.ly/MPStechhandbook)
2. [bit.ly/GetStartedGuides](https://bit.ly/GetStartedGuides)
3. [bit.ly/enrollpassword](https://bit.ly/enrollpassword)
4. [bit.ly/changepasswordMPS](https://bit.ly/changepasswordMPS)
5. [bit.ly/policy5201](https://bit.ly/policy5201)
6. [bit.ly/policy6415](https://bit.ly/policy6415)
7. [bit.ly/policy6415B](https://bit.ly/policy6415B)
8. [bit.ly/MPLSwireless](https://bit.ly/MPLSwireless)
9. [bit.ly/emergencybroadband](https://bit.ly/emergencybroadband)



## Teknoolojiyadda

Magaca Ardayga \_\_\_\_\_

Goobaha  
Dugsiga: \_\_\_\_\_

Fasalka: \_\_\_\_\_ Macalin: \_\_\_\_\_

qalabka:  iPad  Chromebook  Hotspot

Waxaan garowasanahay in aan helay teknoolojiyadda kor ku cad si aan u isticmaalo inta aan ardayga ka ahay MS. Waxaan akhriyay waxyaabahaan, Buuggaan gacanta ee Helitaanka Internetka ee Loo simanyahay ah. Si loo ilaaliyo faa’iidada isticmaalka teknoolojiyaddaan, waxaan aqbalay waxyaabaha soo socda:

Waxaan aqbalay in ana raaco tilmaamaha kujira buuggaan, mana isticmaali doono teknoolojiyadda MPS, meel dugsiga ka baxsan, waxyaabo aan haboonayn ama ujeedooyin aan sharci ahayn.

Waxaan aqbalay in aan teknoolojiyaddayda ku xafido ammaanadayda mar walba mana siin doono mana amaahin doono cid kale.

Waxaan aqbalay in aan teknoolojiyaddayda ku hayo boorsada la igu siiyay.

Waxaan aqbalay in aan teknoolojiyaddaydaku kaydiyo si ammaan ah boorsadayda dhabarka marka aanan isticmaalayn si aay u yareeyo fursadaha lagu waxyeelayn karo ama lagu hurburin karo.

Waxaan aqbalay in aan teknoolojiyaddaan dabeeyo si ay ugu diyaarsanaanto in dugsiga lagu isticmaalo.

Waxaan aqbalay in aan teknoolojiyaddaan kusoo celiyo dugsiga dhammaadka sannadka ama haddii aan dugsiga ka tago.

Waxaan fahamsanahay in haddii aan ku guuldarraysto u hogaansamidda mid kamid ah shuruucdaan iyo/ama xeerarka degmada ay ka dhalan karto luminta faa’iidooyinka isticmaalka teknoolojiyadda Degmada. Intaa waxaa dheer, luminta, waxyeelada, ama si khaldan u isticmaalidda teknoolojiyaddu waxay qaadan kartaaa saacadaha adeegga si dib loogu soo celiyo faa’iidooyinka. Badalaadaha loo baahan yahay ayada oo ay sabab u tahay go’id iyo jabid ama arimo farsamo oo qalabkaaga soo gaaro ma qaadan karaan saacadaha adeegga ama luminta faa’iidooyinka. Degmadu waxay xaq u leedahay in ay koobto tirada badalaadda qalabka teknoolojiyadda ay ardaydasiiso sannad dugsiiyeedkii ama in ay ka ceshato faa’iidada teknoolojiyadda dhammaanteedba haddii ardaygu si khaldan u isticmaalo teknoolojiyadda. Aradydu waa in ay la shaqeeyaan maamulka dhismahooda si loo go’aamiyo waxa ay u baahan yihiin in ay sameeyaan si ay u helaan badalaadda teknoolojiyadda meesha ay ku luntay, lagu xaday ama lagu waxyeeleeyay.

Saxiixa Aradyga: \_\_\_\_\_

Taariikhda:

---

Saxiixa Waalidka:

---

Taariikhda:

---

Isuuwaha Goobta  
Qalabka:

---

Taariikhda:

---